

Inta badan si fudud ayaa xaaladda wax looga qaban karaa oo loo hagaajin karaa

Sida soo socota ayay waalidku uga digi karaan wixii dhib ah ee ka jira xannaanada carruurta

Waa maxay digniin?

Digniin waxaa loolaa jeedaa in la sheego wixii dhib ah ee jira. Waxyaalaha dhibka ahi waa waxyaalo ka soo horjeeda ama ka soo horjeedi kara sharciyada iyo xeerarka, xeerarka xannaanada carruurta ama fahamka guud ee laga qabo waxa macquulka ah ama anshax ahaan la aqbali karo.

Yaad digniinta u gudbinaysaa?

Sida caadiga ah waxaa digniinta loo gudbinayaa cidda ugu dhow meesha uu dhibku ka jiro. Waxaan halkan kugu siinaynaa tusaale ku saabsan meesha aad waxyaalo kale duwan digniinta uga gudbin karto iyo wixii aad samayn lahayd haddii aan digniinta waxba laga soo qaadin/aan waxba laga qaban.

Cabashooyinka ku saabsan:

- **Ilmaha gaarka ah:** madaxa barbaarinta – hoggaamiyaha – mulkiilaha xannaanada carruurta – degmada oo ah mas’uulka xannaanada carruurta – Guddooyimaha gobolka
- **qayb:** madaxa barbaarinta – hoggaamiyaha – SU - mulkiilaha xannaanada carruurta – degmada oo ah mas’uulka xannaanada carruurta – Guddooyimaha gobolka
- **shaqaalaha:** hoggaamiyaha – mulkiilaha xannaanada carruurta – degmada oo ah mas’uulka xannaanada carruurta
- **xannaanada carruurta:** hoggaamiyaha – SU – mulkiilaha xannaanada carruurta – degmada oo ah mas’uulka xannaanada carruurta – Guddoomiyaha gobolka
- **hoggaamiyaha:** mulkiilaha xannaanada carruurta – degmada oo ah mas’uulka xannaanada carruurta – Guddooyimaha gobolka

Sidee ayaad digniinta u gudbinaysaa?

Digniinta waxaa loo gudbin karaa af ahaan ama qoraal ahaan. Inta badan si fudud ayaa xaaladda wax looga qaban karaa oo loo hagaajin karaa. Xiriirka soke ee ka dhexeeya waalidka iyo shaqaalaha xannaanada carruurta ayaa caadiyan loo baahan yahay in uu suura-geliyo in laga wada hadli karo waxyaalaha loo baahan yahay in la saxo. Mararka qaarkood na waxaa laga fursan waayaa in hoggaamiyaha qoraal loo gudbiyo, qoraalkaas oo uu gudbinayo waalidka gaarka ah ama dhawr waalid oo isu tagey ama guddiga waalidka.

Haddii ay xannaanada carruurta aqbali weydo wixii aad kala hadashay, ama aanay fulinnin isbeddelo wax ku ool ah, waxaad markaas arrinta u gudbin kartaa degmada. Sida uu dhigayo xeerka xanna-

anooyinka carruuraha § 8 degmada ayaa mas’uul ka ah xannaanada carruurta, iyada ayaana laga rabaa in ay wax hagto oo ay hubiso in xannaanooyinka carruurta ee degmada loo maareeyo si sharciga waafaqsan. Xiriirka degmada lala samaynayo waa in uu noqdaa mid qoraal ah.

Haddii ay degmado diiddo arrintii aad kala xiriirtay ama ay go’aa-miso in aan mulkiilaha xannaanada carruurta waajib looga dhigayn in uu wax saxo, markaas cabasho rasmi ah ayaad ka gudbin kartaa go’aankaas, sidaas na waxaa qaba qodobbada ilaalinta caafimaadka ee bey’adda lagu sugan yahay § 16 faqradda labaad. Muddada kama danbaysta ah ee cabashadu waa saddex toddobaad oo ka billaabanaaya markii uu ku soo gaaray go’aanka degmada, eeg xeerka maammulka ee soo baxay 10-kii febraayo 1967 § 29.

Maxaa loo baahan yahay in ay digniinta qoraalka ah ku qornaadaan?

Si aad garawshiyo u hesho waxaa muhiim ah in aad adiga isticmaalaha ah keento caddaymo wanaagsan ama aad ka keento mas’uuliyiinta maadda ahaanta mas’uulka ka ah.

Marka arrintaas laga hadlayo waxaa talooyin wanaagsan noqon kara:

- Si kooban oo dhammaystiran u sharrax dhibaatooyinka jira iyo sida loo arko.
- Sharrax wixii dhibaatooyin caafimaad ah iyo wixii dhibaatooyin kale ah ee jira. Mararkaas oo kale waxaa wanaagsan in la keeno caddayn dhakhtar.
- Haddii ay suurtaggal tahay caddaymaha loo baahan yahay ka keen xannaanada carruurta/waaxaha degmada.
- Waxaa wanaagsan in aad tusto xeerarka iyo qodobbada jira iyo sida kuwaas looga leexday ee aad aragtay.
- Kiiska dir isaga oo qoraal ah oo hubi in ay degmadu la socoto.

Way adkaan kartaa in diginin la gudbiyo

Marka uu qofku go’aansado in uu kiis digniin ka gudbiyo meelo badan ayay arrintaasi ku adkaan kartaa. Haddii aad u baahan tahay in kiiska lagaala taliyo oo lagu hago waxaad la xiriiri kartaa FUB (Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruuraha) kuwaas oo ku siin kara talo iyo hagiis.

www.fubhg.no – Tlf.: 477 99 200

Halkan ayaad ka akhrisan kartaa warbixin intaan ka badan adiga oo islamarkaana ku arki kara tusaalayaal digniino loo diray xannaanooyin carruureed:

<https://www.udir.no/globalassets/upload/barnehage/regelverk/veiledere/veiledere-om-helse-miljo-og-trivsel-i-barnehagen.pdf>